UK Health Security Agency

NHS

# Tallaalka Qaaxada (TB-da), BCG iyo ilmahaaga



immunisation

the safest way to protect your child

**Warqaddan daabacan waxay ku saabsan yihiin tallaalka BCG (Bacillus Calmette-Guérin) oo la yabooho si uu uga ilaaliyo cunugaaga xanuunka qaaxada (TB-da).**

## Waa maxay tallaalka BCG?

Tallaalka BCG waxaa ku jira nooc la diciifiyey oo ah bakteeriyada (jeermiska) keenta qaaxada (TB). Maadaama ay tahay mid la diciifiyey ma keenayso TB, laakiin waxay ka caawinaysaa ilmahaaga inuu yeesho iska-ilaalin (cudur iska difaac) uu iskaga difaaco TB-da haddii uu weligii la kulmo ama ay la kulanto.

Tallaalka BCGis wuxuu gaar ahaan waxtar u leeyahay inuu dhallaanka iyo caruurta yaryar ka ilaaliyo nooca khatarta iyo naadirka ah ee TB-da, sida TB-da cagaarshoowga (bararidda dahaadhka hoose ee maskaxda).

## Waa maxay qaaxada (TB-da)?

TB waa caabuq ka dhasha bakteeriya; waxay caadiyan waxyeelaysaa sambabada laakiin waxay sidoo kale waxyeelayn kartaa qayb kasta oo jirka ka mid ah. Qabidda caabuqa qaaxada (TB-da) waxaa suurtagal ah in uusan isu bedelin cudurka qaaxada (TB-da). Cudurka qaaxada (TB-da) ayaa si tartiib ah jirka ugu kordha, waxayna qaadataa dhawr bilood in astaamuhu soo muuqdaan.

Inta badan dadka qaba caabuqa TB weligood ma yeelanayaan cudurka TB-da. Dadkaas, jeermiska TB-du wuxuu ahaadaa mid aan shaqayn cimriga nolosha oo dhan. Dad kale (tusaale ahaan, dadka hanaankooda difaaca jidhku daciif yahay) waxaa laga yaabaa in jeermiska TB-du noqdo mid shaqaynaya uuna sababo cudur TB. Inta badan dadka ku nool dalkan si buuxda ayey uga bogsadaan ka dib daaweynta, laakiin waxay qaadataa dhowr bilood.

## Waa maxay astaamaha TB-da?

TB-da waxaa ay saameyn ku yeellan kartaa meel kasta oo ka mid ah jirka. Astaamuhu way kala gedisan yihiin calaamadaha cudurka ee ilmuhu muujiyana waxaa laga yaabaa inay ka duwanaadaan kuwo dadka waaweyn. Maadaama qaaxada (TB-da) la is qaadsiin karo, waa muhiim in aad cudurka qof kale ku aqoonsan kartid.

Waa inaad la xiriirtaa dhakhtar haddii adiga, cunugaaga, ama xubin kale oo qoyskaaga ka mid ah, ama saaxiib uu leeyahay mid ka mid ah astaamaha soo socda:

- qufac joogto ah oo socda ilaa 2 isbuuc
- qandho
- dhidid, gaar ahaan habeenkii
- miisaanka qofka oo si aan sababteeda la sharixi karin u yaraada
- ilamaha oo culayskiisu kordhi waayo
- daal dareemid guud iyo jirasho aan caadi ahayn
- dhiig la soo qufaco

## Sidee qaaxada (TB-da) loo qaadaa?

Qaaxada (TB-da) waxaad ka qaadi kartaa oo keliya qof sambabadiisa ama cunihiisa uu horey ugu dhacay caabuqa oo qufacaya. Marka ay qufacaan, waxaa soo baxa dhibco yar-yar oo ay ku jirto bakteeriyada. Haddii qof neef ahaan u jiido dhibcaha yar-yar qofkaasina wuu qaadi karaa caabuqa. In khatar loogu sugnaado in caabuqa la qaado waxay qaadataa la wadaagidda meel xidhan lala wadaago qof caabuqa qaba, tusaale ahaan in guri lagula noolaado.

## Ilaa iyo intee ayey qaaxadu (TB-da) faafsan tahay?

UK sanadihii 1950-meeyadii, waxaa jiray in ka badan 50,000 oo xaalado cusub oo qaaxada (TB-da) ah sanadkiiba. Maanta, lambarkani wuxuu hoos ugu dhacay tiro in yar ka badan 5,000 oo kiis oo cusub sanadkiiba. Marka, inkasta oo aysan u badneyn in aad qaadid caabuqa, hadana qof walba waa inuu ka warqabaa astaamaha qaaxada (TB-da).

Tani gaar ahaan waa muhiim sababta oo ah TB-du waa cudur ku baahsan caalamka oo dhan.

Khatarta cudurka ayaa ku badan dadka ku noolaa ama ka shaqeeyey dalal ay ku badan tahay qaaxada (TB-da). Caruurta ka soo jeeda qoysaskan ayaa iyagana u badan in ay xiriir dhow la yeeshaan xubno bulshadooda ka mid ah oo cudurka qaba, ha ahaato UK ama wadankoodii ay asal ahaan ka soo jeedeen.

## Maxay tahay sababta cunugaaga loo siinaayo tallaalka BCG?

UK gudaheeda, sida waddamo kale oo badan, BCG waxaa la siiyaa caruurta ay u badan tahay inay wakhti la qaateen qof qaba TB. Tan waxaa ka mid ah dhallaanka ku nool aag ay ku badan tahay qaaxada (TB-da) ama dhallaanka waalidkood ama awoowayaashood/ayeeyayaashood ka soo jeedaan waddamo ay ku sareyso (TB-da) qaaxada (ka eeg bogga 7aad wixii macluumaad dheeri ah).

## Sidee loo tallaalayaa cunugeyga?

Cunugaaga waxaa laga siin doonaa tallaalka BCG qaybta kore ee gacanta bidix.

Tallaalka waxaa la siiyaa in yar ka dib dhalashada, badanaa ugu dambayn 28 maalmood dhalashada ka dib.

## Ma jiraan wax waxyeelooyin ah?

Isla marka la duro ka dib, fin soo kacay ayaa soo muuqan doonta. Tani waxay muujineysaa in durista loo siiyey si sax ah.

2 ilaa 6 todobaad tallaalka ka dib waxaa soo muuqan doonta bar yar. Tani waxay noqon kartaa nabar ilaa dhowr maalmood, balse si tartiib-tartiib ah ayey u bogsaneysaa haddii aadan daboolin. Waxay reebi kartaa nabar yar. Tani waa caadi.

Mar-marka qaarkood, cunugaagu wuxuu yeelan karaa nabar-gacmeed hoose meeshii looga duray. Haddii ay tani tahay dareere da'aya ayna u baahan tahay in la daboolo, isticmaal suuf qalalan – weligaa ha isticmaalin balastar – ilaa qoloftu ka samaysmayso. Nabarkaani wuxuu qaadan karaa ilaa dhowr bilood inuu bogsado.

Haddii aad welwelsan tahay ama aad u maleynaysid in nabarku caabuq yeeshey, markaa dhakhtarkaaga arag.



## Ma jiraan wax sababo ah oo keeneysa in uusan cunugeyga qaadan tallaalka BCG?

Sida tallaalada kale badankood, duritaanka ayaa suurtagal ah in aan la siinin ama ay noqoto in dib looga dhigo haddii:

- Ilmahaagu uu leeyahay qando saraysa
- Ilmahaaga ay hayso cilad guud oo caabuq maqaarka ah. (Haddii uu jiri qawed, meesha la durayo waxaa loo dooran doonaa meel aan lahayn haar maqaarka ah)

Mar-mar dhif ah, carruurta leh difaac daciif ah, bakteeriyada ku jirta tallaalka ayaa u horseedi karta caabuq daran.

Aad ayey muhiim u tahay in aad u sheegto kalkaalisada ama dhakhtarka haddii ilmahaagu leeyahay, ama looga shakisan yahay, difaac daciif ah. Tusaale ahaan:

- ilmaha in laga daaweynayo kaankaro ama cudurada kale ee halista ah
- ilmaha hooyadii ay xilligii uurka qaadatay dabiibid bayoolaji oo xoojin difaaca jidhka
- ay jirto dhibaato soo taxnayd oo qoyska ah oo la xidhiidha hanaanka difaaca jidhka (tusaale ahaan HIV, (Cilad Aad ah oo isku Dhafan oo Diciifnimo Difaaca Jidhka ah Severe Combined Immunodeficiency) SCID)
- ilmahu qabo ama laga yaabo inuu qabo SCID



## Dhallaankee u baahan in ay qaataan tallaalka BCG

Xitaa haddii aadan ku noolayn meel aan dhammaan caruurta la siin BCG, weli waxaa laga yaabaa in ilmahaagu uu u baahan yahay tallaalka.

Haddi aad uga jawaabtid '**Haa**' mid ka mid ah su'aalaha soo socda waa in dhakhtarkaaga ama kalkaalisadaada aad cunugaaga u weydiisaa tallaalka BCG.

- Cunugaaga, hooyada cunugga, aabaha ama awoowaha/ayeeyada, ama qof kasta oo kula nool, miyey ka soo jeedaan waddan ay ku sareyso qaaxada (TB-da)?
- Adiga iyo cunugaagaba miyaad la noolaan doontaan ama aad la joogi doontaan saaxiibo iyo qoys ku nool mid ka mid ah waddamadan?
- Miyaa cid kula nool, ama ilmahaaga la qaata wakhti badan hadda qabaa TB ama dhowaanahan qabey TB?



Wadamada ay ku badan tahay qaaxada (TB-da) waxaa laga soo qaatay tirooyinka Ururka Caafimaadka Adduunka (WHO) ee:

**www.gov.uk/government/publications/tuberculosis-tb-by-country-rates-per-100000-people**

## Miyaan u baahanahay in aan waxyaalo kale ogaado?

Ilmahaagu wuxuu bilaabi karaa tallaaladiisa caadiga ah marka uu jiro 8 todobaad iyada oo aan loo eegayn marka ay qaadanayaan BCG. Waa inaad hubisaa in aan ilmahaaga la siin duritaan kale oo laga siiyo isla gacanta BCG ugu yaraan 3 bilood ka dib; haddii kale waxaa laga yaabaa qanjidhada meeshaasi inay bararaan.




Hubi in tallaalka BCG lagu daro Diiwaanka Shaqsiga ah ee Caafimaadka Ilmahaaga (Buugga cas) si loo tixraaco mustaqbalka.

## Macluumaad dheeraad ah

Haddii aad u baahan tahay macluumaad dheeraad ah oo la xidhiidha TB, ama tallaalka BCG ama wax tallaallo kale ah, la hadal dhakhtarkaaga, soo-booqdahaaga caafimaad, umuliso ama kalkaaliso; ama booqo boggayaga internet-ka ee **www.nhs.uk/conditions/vaccinations/bcg-tuberculosis-tb-vaccine/**

**Xusuusnow, daaweynta qaaxada (TB-da) waxaa ay qaadataa muddo dheer, ka hortagga ayaa aad uga sahllan.**

NHS

© Crown copyright 2021
2021SCTBSO Somali 75 2p Sept 2021 (APS).
Si aad u dalbato nuqulo badan fadlan booqo Health Publications
**www.healthpublications.gov.uk**
ama wac: 0300 123 1002, 0300 123 1003 (8 subaxnimo ilaa 6 fiidnimo, Isniin ilaa Jimce).